

Carbapenem-ka-hortagga Enterobacterales (CRE)



**Su'aalaha Inta badan la Isweydiyo ee
Waalidiinta iyo Xubnaha Qoyska**

Waa maxay CRAB?

- Waa bakteeriyo ku dhex faafta xarumaha caafimaadka muddo dheer.

Waa maxay khatartu?

- Way adkaan kartaa in lagu daaweeyo daawada caadiyan lagu daaweeyo jeermiska.
- Si degdeg ah ayuu ugu dhex faafi karaa xarumaha caafimaadka. Wuxuu keeni karaa caabuqyo daran, marka jeermisyadu ay galaan jirkaaga aadna la xanuunsato. Wuxuu xataa keeni karaa geeri.

Sidee ayaan iskaga difaaci karaa?

- U sheeg dhakhtarkaaga haddii marna lagaa helay xanuunka CRE ama caabuq kale oo aysan daawadu karin.
- Waxaad xaq u leedahay in lagugu daaweeyo gacmo nadiif ah. Dhammaan shaqaalaha caafimaadka waa inay farxashaan ama ay adeegsadaan jeermis dilaha gacmaha kahor intaysan ku taaban adiga ama tuubooyinka jirkaaga ku xiran. Haddii aadan arkin ayagoo farxalanaaya, waa caadi inaad weydiiso inay farxashaan.
- Dadka ku soo booqda way kuu naxayaan. Sidoo kale waa caadi inaad ayagana ka codsato inay farxashaan ama ay adeegsadaan gacmo nadiifiye.
- Shaqaalaha ayaa imaan kara qolkaaga si ay u nadiifiyaan uguna shubaan jeermis dile. Waxay sidaan u sameeyaan si ay u ilaaliyaan badqabkaaga. Fadlan raac tilmaamaha ku aadan waxa aad samaynayso inta hawshaan socoto.

Kawaran haddii aan qabo su'aalo?

- Waydii dhakhtarkaaga ama kalkaalisada.
- Booqo webseedkeena, sdhai.org si aad u hesho xog dheeraad ah ama iskaanka mari koodhka QR ee dhanka midig.

